**DAQIIQADAHA KULANKA EE GUDIGA ISKUULKA BOSTON**
**IMTIXAANKA DUGSIGYADA EE TASK FORCE**

**Khamiis, Bisha Lixaad 24, 2021**

Guddiga Task Force ee Qaabilaadda Dugsiyada Imtixaanka ee Dugsiyada Boston ayaa qabtay shir onlaayn ah bishii Juun 24, 2021 markay ahayd 5 galabnimo. ee Zoom. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan mid ka mid ah waxyaabaha hoos ku taxan, booqohttps://www.bostonpublicschools.org/esataskforce, Imeyl feedback@bostonpublicschools.org ama wac Xafiiska Guddiga Dugsiyada ee Boston (617) 635-9014.

## SOO XAADIRISTA

Xubnaha Task Force ee Ogolaanshaha Iskuulada Imtixaanku Waa Joogaan: Guddoomiye Michael Contompasis; Guddoomiye Tanisha Sullivan; Samuel Acevedo; Acacia Aguirre; Simon Chernow; Matt Cregor; Tanya Freeman-Wisdom; Katherine Grassa; Zena Lum; Samuel Acevedo; Rachel Skerritt; Rosann Tung; iyo Tamara Waite.

Xubnaha Task Force ee Iskuulada Imtixaanku Waa Maqanyihiin: Midna.

Shaqaalaha Jooga ee BPS: Monica Roberts, Madaxa Ardayda, Horumarka Qoyska iyo Bulshada; iyo Monica Hogan, Agaasimaha Sare ee xafiiska Macluumaadka iyo Isla xisaabtanka.

## DHOKUMANTIYADA LASOO JEEDIYAY

Ajandaha

War murtiyeedka Kulanka: Juun 14, 2021 kulan

War murtiyeedka Kulanka: Juun 17, 2021 kulan

Matalaada Task Force ee Imtixaanka Dugsiga, Juun 24, 2021

Go'aaminta Ku haboonaanshaha Soo jeedinta

## ANSIXINTA WAR MURTIYEEDKA SHIRKA JUUN 14 IYO JUUN 17, 2021

**La Ansixiyay -** Gudiga waxay si aqlabiyad leh ku ansixiyeen war murtiyeedka Juun 14keeda, 2021 ee kulanka Task Force Imtaxaanka Dugsiga ee Wax ka beddelka uu sameeyay Dr. Tung.

***La Ansixiyay -*** Kooxda Task Force waxay si aqlabiyad leh ku ansixiyeen war murtiyeedka shirkii dhacay Juun 17 keedii, 2021 Kulanka Galitaanka Imtixaanka Dugsiyada ee Task Force.

## DAAHFURIDA

Mr. Contompasis ayaa daahfuray kulanka. Wuxuu ku dhawaaqay in adeegyo tarjumaad isku mar ah lagu heli karo Isbaanish, Haitian Creole, Cabo Verdean, Somaali, Vietnamese, Cantonese, Mandarin, Carabi, iyo Luqadda Calaamadaha Mareykanka (ASL); tarjumaanada ayaa isbaray waxayna ku bixiyeen tilmaamo afkooda hooyo sida loo helo turjumaad isku mar ah iyagoo badalaya kanaalka Zoom.

Ms. Parvex ayaa yeedhiyay liiska. Mr. Acevedo, Ms. Aguirre, Mr. Chernow, Mr. Cregor, iyo Dr. Freeman-Wisdom ayaa yimiday kadib xaadiriska.

## WADAHADALKA

Mr. Contompasis wuxuu xusuusiyey xubnaha Task Force ay kulmi doonaan Isniinta, Juun 28 iyo Khamiista, Juun 29. Wuxuu sheegau waxaa jira xog la sugayo oo la xidhiidha qoondaynta kursiga oo aan la soo bandhigi doonin fiidkan, sidaa darteed xubnahu wax talaabo ah ka qaadi maayaan qoondaynta kursiga kulanka. Arinka talaabada labaad wuxuu ahaa shuruudaha ku haboonaanshaha, Mr. Contompasis wuxuu sheegay inuu soo bandhigi doono soo koobid shuruudahan oo kooxda Task Force ay suuragal tahay inay gaaraan heshiis ama ay ugu codeeyaan.

Ms. Sullivan waxay u mahadcelisay xubnaha Task Force sida ay uga go'nayd shaqadu waxayna sheegtay inay ku rajo weyn tahay inay awoodaan inay u soo bandhigaan talo Gudiga Dugsiga oo ka caawin doona Boston Public Schools iyo sidoo kale Magaalada Boston inay horay u socoto.

Ms. Hogan waxay soo bandhigeen codsiyo xog joogto ah kuwaas oo ahaa tusaalayaal iskuxidhay tilmaamta faqrinimada saraysa. Matalaadii ugu horreeysay waxay ahayd 20% magaalada oo dhan, 80% waxa qaybiyay tier, tan labaadna 100% waxa qaybiyay tier. Kuwaas waxaa lagu soo bandhigay xaalad dhaqaale, midab, iyo lambarka zip-ka.

Ms. Aguirre weydiisay sida dhibcaha ay u saameyn doonaan ardayda ku jirta barnaamijka METCO, maadaama iskuulada nawaaxiga ku yaal aysan u qalmi doonin inay noqdaan iskuulo faqiirnimo sare kajirto, ardayduna ma heli doonaan dhibcaha iyadoon loo eegin xaalada qoys. Ms. Sullivan ayaa sheegtay in dhibcaha dheeriga ah ee heerka saboolnimada sare ay ku salaysanyihin iskuulada ujeedada laga leeyahayna ay tahay in ardayda METCO ay heli doonaan ilo dhaqaale oo ay ugu wacantahay dugsiyada ay joogaan.
Ms. Grassa waxay sheegtay iyadoo ay u sabab tahay badalka heerka 6aad, ardayda qaar waxay joogi karaan dugsi aan dhaqaale ahaan faa'ido lahayn, oo tag dugsi dhexe oo faa'ido dhaqaale leh, ama sidaa caksigeeda. Ms. Skerritt waxay intaa ku dartay inay aad ugu dhawdahay waxbarashadooda inay qaabayso khibradooda heerka 5aad oo aan ahayn heerka 6aad. Ms. Sullivan waxay sheegtay iyada oo ku saleynaysa indha indheyntaas, waa inay eegaan dugsiga fasalka 5aad ee ardaygu dhigto, oo ma aha fasalka 6aad.

Ms. Sullivan wuxuu sii waday falanqaynta ku haboonanshaha, gaar ahaan sanad dugsiyeedka (SY 2023-2024). Waxay soo koobtay inay ka hadleen isticmaalka qiimaynta heer ahaan si loo helo koox, kaasoo laba mid uun ah muujinayana waxqabadka heerka fasalka 5aad ee MCAS ama heerka 5aad ee dhibcaha MAP, ama dhibcaha heerka 6aad ee MAP. Marka kooxda la joogo, waxay isticmaali doonaan fasalka 5aad ee Farshaxanka Luqadda Ingiriisiga (ELA) iyo dhibcaha xisaabta, iyo fasalka 6aad ee ELA, xisaabta, sayniska, iyo cilmiga bulshada.

Kadib markay ku celisay diidmada inay isticmaasho tijaabo, Dr. Tung waxay soo jeedisay doorasho kale oo ahayd in la isticmaalo dhibco isku dhafan oo ay kujiraan Celceliska Heerka Dhibcaha (GPA) iyo qiimeynta tilmaanta faqiirnimada sare. Waxay xustay inay markaa si siman ugu qaybin doonaan kuraasta si kasta oo ay u jiraan kooxaysi dhuleed ama mid dhaqaale oo ay go'aansadaan waxayna noqonaysaa 100% ardayda mana ahan kaliya 80% ardayda. Waxay sidoo kale sheegtay inay la xidhiidhay Dr. Lorrie Shepard, oo u soo bandhigtay Task Force kulan hore, oo ku taliyay in dhibcaha la gooyey ay noqdaan wax la mid ah celceliska gobolka iyo qarankaba, oo hooseeya si loo wada dhan yahay.

Mr. Contompasis wuxuu la yaabay sida ay Task Force u wajihi doonto dhamaan tabashooyinka soo kordhay taas oo ka dhigtay inay go'aan ka gaaraan heerka halkii ay ka ahaan lahaayeen imtixaan miisaan leh.

Ms. Sullivan waxay sheegtay in tabasho ay ka qabto isticmaalka qiimeynta heerka ay tahay inay sameyn doonaan qiimeynta xitaa haday ka sii sareyso marka loo eego siyaasada ogolaanshaha hore ee Covid, maadaama tani ay tahay wadada kaliya ee lagu galo kooxda, waxayna raacisay inay diyaar u tahay inuu wadahadal kala yeesho dhibcaha isku dhafan.

Mr. Cregor wuxuu sheegay inuu xiiseyn doono qaabka dhibcaha isku dhafan laakiin leh culeys ka badan xaga dhibcaha marka loo eego imtixaan hal mar ah. Ms. Skerritt waxay sheegtay inay u maleyneysay in dhibco isku dhafan oo leh tilmaamayaal badan ay u shaqeyn doonaan tusaha faqiirnimada saraysa iyadoo caksi ku ah nidaam kali ah, laakiin waxay sidoo kale sheegtay inay qabto tabasho ku saabsan noocyada tijaabada badan.

Mr. Contompasis muujiyay islaaydhka shuruudaha u qalmitaanka sida looga wada hadlay shirarkii hore, iyo nidaamka la soo jeediyay. Soojeedintu waxay ahayd in ardaygu buuxiyo heerka u-qalmitaanka qiimaynta oo lagu daro GPA ee B ama wax ka sareeya. SY 2022-23, darajooyinka loo qaatay akoonku waxay noqon doonaan labada xilli ee ugu horeysa fasalka 6aad ee ELA, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada; iyo sanad dugsiyeedka 2023-24 iyo wixii ka dambeeya wuxuu noqonayaa teeramkii ugu dambeeyay ee fasalka 5-aad ee ELA iyo labada xilli ee ugu horreysa ee fasalka 6-aad ee ELA, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada. Wuxuu sheegay talo soojeedinta SY22-23, waxay ahayd in aan qiimeyn loo sameynin Covid-19 awgeed.

Xubnaha ayaa ka wada hadlay sida ay u isticmaali doonaan GPA haddii imtixaanku uu yahay shuruudaha kaliya ee u-qalmitaanka ee lagu galo kooxda oo bakhtiyaanasiibka lagu xusho kooxda dhexdeeda.
Ms. Sullivan wuxuu waydiiyay xubnaha sida ay dareemayaan markay isticmaalayaan qiimaynta heer ahaan marka la barbar dhigo waa qayb kamid ah dhibcaha isku dhafan. Mr. Acevedo, Mr. Cregor, Mr. Chernow, Ms. Aguirre, Ms. Skerritt, and Ms. Grassa ayaa sheegay inay dhammaantood u furan yihiin fikradda ah in qiimeynta loo adeegsado dhibco isku dhafan.

Ms. Sullivan ayaa sheegay in haddii ay isticmaaleen dhibco isku dhafan oo u-qalmitaanka, ay tahay inay ka wada hadlaan haddii farsamadu ay tahay inay noqoto bakhtiyaanasiib u qalma, darajo toosan, ama nidaam isku-dhafan.

Ms. Aguirre waxay sheegtay inay u maleysay inay ka wada hadlayaan boqolkiiba inta imtixaanka iyo GPA inay tixgeliyaan ka hor intaan laga wada hadlin sida ay kuraasta ugu qoondaynayaan

Ms. Sullivan waxay xubnaha ka codsadeen inay soo jeediyaan boqolkiiba culeyska ay soo jeediyeen qayb kasta. Mr. Cregor wuxuu soo jeedinayaa isticmaalka dhibcaha 70% iyo 30% qiimaynta. Mr. Tung wuxuu soo jeedinayaa dhibcaha 80% iyo 20% qiimaynta. Ms. Skerritt wuxuu soo jeedinayaa mid walba 50%. Ms. Aguirre wuxuu soo jeedinayaa dhibcaha 60% iyo 40% qiimaynta. Ms. Sullivan waxay sheegtay inay ka codsan doonaan Ms. Hogan inay ku maamusho tusaalayaashan 10% tilmaamaha faqiirnimada saraysa.

Ms. Sullivan waxay ka codsadeen xubnuhu inay bilaabaan ka wada hadalka habka qoondaynta kursiga oo ahayd darajo toos ah, bakhtiyaa-nasiib ama nidaam badan.

Ms. Nagasawa weydiiyay sida nidaamkan uga shaqeyn doonto 10% kor u qaadista dugsiyada faqiirnimada sare ku xusan ee bakhtiyaanasiibka ardayda oo dhan markay kujiraan kooxda. Ms. Sullivan ayaa sheegtay in aysan faa'iido ugu jirin nidaamka ardaydaas laakiin ay ka caawin doonto inay uqalmaan kooxda. Waxay sidoo kale sheegtay in si loo gaadho kala duwanaanshaha dhaqan-dhaqaale iyo dhuleed loona daboolo wixii ay ku soo rogeen ee fii ah, ma awoodi doonaan inay isticmaalaan bakhtiyaa-nasiibka 100% u qalma, laakiin waa inay ku guuleystaan bakhtiyaanasiibka heerarka dhaqan-dhaqaale, ama qaybaha dhuleed.

Kadib wada hadal kooban oo udhaxeeyey xubnahan boqolkiiba inta matalaada ay waydiisan doonaan, Ms. Sullivan waxay sheegtay inay waydiisan doonaan matalaadan soo socda ee habka qoondeynta kursiga:

1. 100 % dhibco toos ah oo dhamaan heerarka
2. 20% darjada magaalada oo dhan ah iyo 80% dhamaan heerarka ayaa darajo leh
3. 20% darajada guud ahaan magaalada, 40% , iyo bakhtiyaanasiibka 40% dhamaan heerarka oo dhan

Dr. Tung wuxuu sheegay in gababada uu ahaa siyaasada koodhka zip-ka ee la siiyay uu ka waynayahay kala duwanaanshaha marka loo eego heerarka oo waxay doorbidaysaa koodhka zip-ka oo aan ahayn heerarka.

Ms. Sullivan waxay cadaysay mudada siyaasada ay soo saartay kala duwanaanshaha ugu wayn taasoo ay u aragtay inay ka gudbayso dhamaan tusiyaasha heerarka: jaarnimada, xaalada dhaaqan-dhaqaale, midab, jinsi, nooca waxbarashada, iyo bartayaasha luuqada Ingiriisiga. Waxay sheegtay inay wali sugayso macluumaadka ka imanaya tirakoobka lakin sidoo kale ay ka ogsoontahay u raadinta xal dhamaan arimaha iyo tabashooyinka soo baxay.

Mr. Cregor wuxu intaa ku daray inaanay amarkooda ahayn in midab ahaan lagu dheeli tiro diwaangalinta imtixaanada dugsiyada, taas waxa go'aamin karta waxaan sharci ahayn oo ay samaysay maxkamdu. Wuxuu sheegay in go'aankoodu uu yahay in la abuuro siyaasado galitaan kaasoo maxsuulka ka dhalanayaa uu yahay qaybaha ardayda dugsiyadu inay humaag wanaagsan ka bixiyaan magaalada. Isaga taas macnaheedu wuxuu ahaa dadaal meesha lagaga saarayo caqabadaha hortaagan fursadda waxbarasho ee loo siman yahay si ardayda dugsiga imtixaanka ay u dareemaan faa'iidooyinka waxbarasho ee kala duwanaanta

***Khamiis, Bisha Lixaad 24, 2021***

Mr. Contompasis wuxuu xusuusisay xubnahan in filashadoodu ay ahayd in muddo kadib la helo tiro aad u fara badan oo arday ah oo ka faa'iideysan doonta khibradda dugsiga imtixaanka. Wuxuu sidoo kale sheegay inuu dhiseen talaabooyin nidaam oo dib loogu eegayo oo lagu hagaajinayo waxay aasaaseen.

## FAALOOYINKA GUUD EE DADWEEYNAHA

- José Valenzuela, oo deggan magaalada Roslindale, macallinka Boston Latin Academy (BLA) iyo dadkii ka baxay Boston Latin School (BLS), ayaa ka markhaati kacay taageeridda shaqada kooxda Task Force.

## FAALOOYINKA XIDHITAANKA

Gudoomiyaashu waxay u mahadnaqeen xubnaha iyo dadwaynahaba.

## GABAGABADA

Ku dhawaad 7:50 fiidnimo, Guddigu wuxuu u codeeyey si aqlabiyad ah, oo ku saabsan liiska, in lagu soo gabagabeeyo kulanka.

Markhaati:

Lena Parvex
Caawiyaha Maamulka